



## Heshiiska Galkacyo

Arbaco, 02/12/2015

Wafdi uu hogaaminayo Ra'iisal Wasaaraha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya Mudane Cumar Cabdirashid Cali Sharmarke oo ka kooban Wasiirro, Xildhibaan, iyo Madaxda Dawlad-goboleedyada Jubaland iyo Koonfur Galbeed ayaa safar nabadeed waxey ku soo mareen magaalooyinka Cadaado, Garoowe iyo Gaalkacyo kadib dagaallo si ayaan-darro ah uga soo cusboonaaday Magaalada Galkacyo muddadii 22-28 November 2015. Dagaalladaas ayaa waxa laga dhaxlay khasaaro naf iyo maalba leh iyo barakac ballaaran oo saameeyay noloshii iyo meheradihii dadweynaha.

Dowladda Federaalka Soomaaliya iyada oo ka anba qaadeeysa Mas'uuliyadda ka saaran shacabkeeda iyo nabad iyo xasillooni kusoo dabaalidda dhulkeeda ayay waxa ay wada hadal kalsooni abuur ah u furtay labada Dowlad Goboleed ee walaalaha ah Puntland iyo Galmudug si ay ugu dhameystaan shaqaaqooyinka soo kale dhex galay wada hadal iyo kalsooni.

Dowlad Goboleedyada Puntland iyo Galmudug ayaa soo dhaweeyay baaqii NABADDA oo ay ka yimid Dowladda Federaalka Soomaaliya kuna heshiiyay dhaqan-gelinta qodobboda hoos ku xusan:


1. Baaq nabadeed oo waara, xabad joojin shuruud la'aan ah iyo soo afjaridda colaadda af iyo addinba, lagana fogaado wax walba oo dhalin kara iska hor imaadyo hubeysan iyo abaabul colaadeed.
2. Kala raridda ciidamada is hor fadhiya, koox walibana hubka iyo ciidamada iney geyso xeryihii ay ku sugnaayeen ka hor colaadda.
3. Soo celinta dadweynihii ka barakacay labada dhinac ee magaalada, dhan walbana uu bixiyo tas-hiilaatka muhiimka u ah xaaladda bani aadannimo, ayadoo ay gacan ka geysaneyso Dowladda federaalka ah.
4. Magacaabidda guddi ka kooban Dawladda Federaalka iyo dawlad-goboleedyada oo wada xaajood ka yeesha xallinta khilaafka Galkacyo, kadibna la fidiya gogol lagu xallinayo khilaafka labada maamul-goboleed.



Waxan lagu dhiirri-gelinayaa odayaasha dhaqanka, ganacsatada iyo culimaa'udiinka iney ka qeyb qaataan sidii loo heli lahaa dib-u-heshiisiin iyo kalsooni waarta. Ugu dambeeyntii, waxaan si gaar ah ugu mahad celinaynaa Madaxweynayaasha Jubaland iyo Koonfur Galbeed Mudane Sheekh Axmed Islaan Madoobe iyo Mudane Sharif Xasan Sheekh Aaden oo dadaal adag ka geestay daminta colaadda iyo ka shaqeynta nabadda.

Wabillaahi Towfiq.

Cabdiweli Maxamed Ali  
Madaxweynaha Puntland




Cabdikarim Xuseen Guuleed  
Madaxweynaha Galmudug




### Damaanad-qaade

Cumar Cabdirashid Cali Sharmarke  
Ra'iisul-wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya



### Markhaati

Axmed Maxamed Islaam  
Madaxweynaha Jubaland



Shariif Xasan Sh. Aden  
Madaxweynaha K/Galbeed

